TS.DWI. Somali. (Rev 2019)

# BULSHOOYINKA KU MIDOOBAY KAXEYNTA BAABUURTA IYADOO UU QOFKA XISKIISA JOOGA

SI WAXTAR LEH OO TOOGAN SAAMEYN UGU LAHOW BULSHADAADA
Sameeyso Qorshaha Darawalka Xiskiisa jooga ee haysta shaatiga baabuurta lagu kaxeeyo: ma laha wax kharash ah oo kaga baxayaa waxaadna sidoo kale aad badbaadin kartaa nolol

**Sarkhaansanaanta** waa Qadarka Khamriga ee ku jira Dhiigga (BAC) .kaas oo gaarayaa .08 boqolkiiba amaba wax ka badan. **BAC-ga** gaarayaa boqolkiiba .08 amaba wax ka badan ayaa muujinayaa caddaynta in qofka uu sarkhaansan yahay, halka **BAC-ga** boqolkiiba .18 amaba wax ka badan uu muujinaayo caddeynta khatarta kaxeynta baabuurta isagoo uu qofka sarkhaansan yahay . Qofka wuu sarkhaami karaa isagoo cabayaa khamri.

**Waxyeelada** waa saameynta uu maandoriye kaste ku lahaan karo jirkaaga taas oo ka dhigeysa inaad awoodi weyso inaad adeegsato go'aan wanaagsan oo ku aaddan kaxeynta baabuur. Maandooriyahaasi wuxuu noqon karaa khamri, daawooyinka lagu soo qoray amaba kuwa aan lagu soo qorin. Qadarka Khamriga ee ku jira Dhiigga (**BAC)** ee ka badan boqolkiiba .05 waa caddeynta sharci ee muujinaysa in maandooriyaha uu waxyeelo ku gaystay.

**Qofka xiskiisa jooga** waa qofka aan wax maandooriye ah amaba khamri aan isticmaalin. Darawalka xiskiisa jooga waa qofka aan isticmaalin wax khamri ah amaba maandooriye haystana shaati lehna xirfadda lagu kaxeyn karo baabuur.

## Sameyso Qorshe

### Darawalka haysta Shaatiga kaxeynta baabuurta ee uu Xiskiisa Jooga

- Mar welibo raac darawalka haysta shaatiga kaxeynta baabuurta ee uu xiskiisa jooga, darawalka aan cabin khamriga amaba uusan waxyeelo uu geysanin maandooriye.
- Haddii dabaaldegyada uu qayb ka yahay khamri ka hor inta aaddan aadin sameysta qorshaha qofka noqonayaa darawalka haysta shaatiga kaxeynta baabuurta ee uu xiskiisa jooga kaas oo idin soo galbin doona kadib xafladda.
- Noqo saaxiib wanaagsan oo sheeg haddii aad uu maleyneyso in qof idin kamid ah uu sarkhaansan yahay amaba uu waxyeeleeyay maandooriye. Ka cawi helida darawal haysta shaatiga kaxeynta baabuurta amaba waco tagsi si uu si badqab leh kugu geeyo gurigaaga. Ha uu ogolaanin in iyaga ay kaxeeyan baabuurka.
- Carruurtu waa in ay mar welibo raacan darawalinta haysta shaatiga kaxeynta baabuurta ee uu xiskooda joogo. Samee qorshe aad uga ilaalineyso carruurta darawalinta sarkhaansan amaba uu waxyeeleeyay maandooriye.
- Darawalinta sarkhaansan amaba uu waxyeeleeyay maandooriyaha ee baabuurtooda ay saaran yihiin carruurta ay da'dooda ka hooseyso 16 waxaa lagu soo oogi karaa dembi culus marka loo eego sharciga Leandra.

# OGOW DHIBAATADA KA DHALAN KARTA INAAD KAXEYSO BAABUUR ADIGOO SARKHAANSAN/UU KU WAXYEELEEYAY MAANDOORIYE (DWI)


## QOFKA UU SARKHAAMIYAY KHAMRIGA AMA UU WAXYEELEEYAY MAANDOORIYAHA

**Kaxeynta baabuurka Adigoo Sarkhaansan/uu ku waxyeeleeyay maandooriye ayaa waxyeello uu geysaneysa shaqsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka. Shilalka ayaa dhaca waxaana laga yaabaa in dad waxba aan galabsan in uu dhaawac soo gaaro amaba ay dhintaan. Sharciyada ka ilaaliya dadka darawalada sarkhaansan / uu waxyeeleeyay maandooriyaha ayaa ah kuwo adag ganaaxa ayaana ah mid aad uu culus. Dadka lagu helo dembiyada DWI ayaa lagu xukumi karaa xabsi, waxey waayi karaan ogolaanshaha kaxeynta baabuur, waxey lumin karaan shaqooyinkooda waxaana ay sidoo kale tani saameyn ku yeelan kartaa xaladooda socdaal.**

**HADDII LAGU KATIINADO OO LAGU XIRO/DACWAD LAGUGU SOO OOGO/XABSI LAGU DHIGO/WAC TELEFOONKA**



| | |
|---|---|
| LACAGTA KAGA BAXEYSO JIIDITAANKA BAABUURKA/KEYDINTA…………………… | $300.00 |
| IN XABSIGA LAGU DHIGO IYO IN DAMAANAD LAGUGU SOO SIIDAAYO…………… | $500.00 |
| QAREENKA DHANKA DEMBIYADA ………………………………………… | $1000.00-$5000.00 |
| QAREENKA DHANKA SOCDAALKA ………………………………………… | $?????? |
| GANAAX LACAGEED/LACAGO DHEERAAD AH……………………………… | $250.00-$2000.00 |
| QALABKA BAABUURKA UU KU XIRAN YAHAY EE UU KU KACO…… | $150.00 |
| BAARITAANKA KHAMRIGA…………………………………………………… | $150.00 |
| GUDDIGA SAAMAYNTA SOO GAARTAY DHIBANAHA………………… | $50.00 |
| KORMEERKA XILLIGA QOFKA UU WAXBARANAAYO………………… | $250.00 |
| DDP…………………………………………………………………………… | $175.00 |
| GANAAXA XALKA AAN DEMBIGA AHAYN EE DMV……………………… | $200.00 |
| SHAATIGA LAGU XIRAYO SHURUUD…………………………………… | $100.00 |
| QIIMAYNTA (HAL MAR SADDEXDII SANABA)………………………… | $250.00 |
| CAYMISKA BAABUURTA…………………………………………………… | ????? |
| WADARTA QIIMAHA LACAGTA……………… | 10,000.00 DOOLAR IYO KA BADAN |




# KHARASHAADKA KALE EE SUURTAGALKA AH:

**INAAD ADIGA DHIMATO AMABA AY DAD KALE DHINTAAN**
**INAAD WEYSO XORRIYADDAADA**
**CAWAAQIIBTA DHANKA SOCDAALKA:**

- **Dhibaatada dhanka helida Kaarka Deeganaanshaha iyo Muwaadinnimada**
- **In lagugu daro Hababka Lagu saarayo Dadka**
- **In ay ku musaafuriso dowladda Maraykanka**